# Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta

**Macluumaadkaaga. Xuquuqdaada Waajibaadkayaga.**
Ogaysiiskani wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan loo isticmaali karo loona bixin karo iyo sida aad ku heli karto macluumaadkan.
***Fadlan si taxaddar leh u eeg.***

**Xuquuqdaada**
**Waxaad xaq u leedahay...**

- ✓ **In aad hesho nuqul/koobiga diiwaankaaga caafimaad ee elektaroniga ah ama warqaddaada ah**
  - Waxaad codsan kartaa inaad aragto ama aad hesho nuqul diiwaankaaga caafimaadka elektirooniga ah ama warqad ah iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee aan kaa hayno adiga oo keenaya ogolaansho qoraal ah (ROI). Waxaan ku siin doonaa nuqul ama soo koobista macluumaadkaaga caafimaadka ah, badanaa 30 maalmood gudahood markii aad codsato. Waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno khidmad macquul ah, oo kharashka ku salaysan. ROI (ogolaanshaha qoraalka ah) waa laga noqon karaa wakhti kasta iyadoo qoraal ahaan ah.
  - Waxaad codsan kartaa gelitaanka boggeena macaamiisha si aad u eegto diiwaanada caafimaadka oo cayiman.
- ✓ **In aad saxdo diiwaankaaga caafimaadkaaga warqadda ama elektaroniga ah**
  - Waad na weydiin kartaa inaan saxno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee aad u malaynayso inuu khaldanyahay ama uusan dhammaystirnayn.
  - Waxaan odhan karnaa “maya” codsigaaga, laakiin waxaan kuugu sheegi doonaa sababta qoraal ahaan 60 maalmood gudahood.
- ✓ **In aad codso xiriir qarsoodi ah**
  - Waxaad na weydiinsan kartaa inaan si gaar ah kuula soo xiriirno (tusaale ahaan: taleefanka guriga ama xafiiska) ama aan ugu dirno boostada cinwaan kale.
  - Waxaan odhan doonaa "haa" dhammaan codsiyada macquulka ah.
- ✓ **In aad na weydiisato inaan xaddidno macluumaadka aan wadaagno**
  - Waxaad na weydiinsan kartaa in aanaan u isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaadka qaarkood ee Daaweynta, Lacag-bixinta, ama Hawlgallada. Naloogama baahna in aan aqbalno codsigaaga, waxaanan odhan karnaa “maya” haddii ay saamayn ku yeelanayso daryeelkaaga.
  - Haddii aad ku bixiso adeeg ama shay daryeelka caafimaadka ah jeebkaaga dhammaantii, waxaad na weydiisan kartaa in aanaan caymis bixiyahaaga ula wadaagin macluumaadkaas ujeeddada lacag bixinta ama howlaheena. Waxaan odhan doonaa "haa" aan ka ahayn haddii uu sharcigu nooga baahan yahay inaan wadaagno macluumaadkaas.
- ✓ **In aad hesho liistada dadka aan la wadaagnay macluumaadkaaga**
  - Waxaad codsan kartaa liiska (akoonka) wakhtiyada aan wadaagnay macluumaadkaaga caafimaad lixdii sano ee ka horraysay taariikhda aad na waydiisatay, cidda aanu la wadaagnay, iyo sababta.
  - Waxaan ku soo dari doonnaa dhammaan sheegiitaanada marka laga reebo kuwa ku saabsan Daaweynta, Lacag-bixinta, iyo Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka, iyo sheegiitaano kale oo cayiman (sida mid kasta oo aad naga codsatay inaan samayno).
  - Waxaanu ku bixin doonaa hal liisto sanadkiiba bilaash ahaan laakiin waxaan kaa qaadi doonaa lacag khidmad macquul ah, haddii aad mid kale codsato 12 bilood gudahood.
- ✓ **In aad hesho nuqul ka mid ah ogaysiiskan asturnaanta**
  - Waxaad na waydiisan kartaa nuqul warqad ogaysiiskan ah wakhti kasta, xitaa haddii aad ogolaatay inaad ku hesho ogaysiiska elektaroonig ahaan. Waxaan ku siin doonaa nuqul warqad si dhakhso leh.
- ✓ **In aad xulato qof adiga kuu matala**
  - Haddii aad qof siisay Awooda Qareen Caafimaad ama haddii qof uu yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qofkaasi wuxuu adeegsan karaa xuquuqdaada wuxuuna samayn karaa go'aano ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.
  - Waxaan hubin doonnaa inuu qofku ogolaansho haysto oo uu adiga ku matalo ka hor intaanan qaadin wax tallaabo ah.
- ✓ **In aad ashkato xarayso haddii aad rumaysanatahay in xuquuqdaada gaarka kuu ah lagu xadgudbay.**
  - Waad ka soo ashkatoon kartaa haddii aad dareento in aanu ku xadgudubnay xuquuqdaada adiga oo nala soo xiriiraya macluumaadka ku yaalla bogga kore.
  - Waxaad ka xaraysan kartaa ashkato Waaxda Caafimaadka iyo Adeega Aadanaha ee Maraykanka Xafiiska Xuquuqda Madaniga adiga oo warqad u diraya 200 Independence Avenue, SW, Washington, DC 20201, ama soo waca 1-877-696-6775, ama soo booqda www.hhs/gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
  - Kaama aargoosan doonno in aad dacwad xaraysay.

**Xulashooyinkaaga**

**Macluumaadka caafimaadka qaarkii, waxaad noo sheegi kartaa xulashooyinkaaga ku saabsan waxa aan wadaagno.** Haddii aad leedahay doorbid cad oo ku saabsan sida aan u wadaagno macluumaadkaaga ku jira xaaladaha hoos lagu sharaxay, nala hadal. Noo sheeg waxaad rabto inaan samayno, waanan raaci doonaa tilmaamahaaga.

**Xaaladahaas, waxaad leedahay xaq iyo ikhtiyaar labadaba aad noogu sheegto in aan...**

- ✓ In aan u sheegno qoyskaaga iyo asxaabtaada xaaladaada
- ✓ In aan bixino gargaarka masiibada
- ✓ In aan kugu darno diiwaanka isbitaalka

Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto waxa aad doorbidayso, tusaale ahaan haddii aad suuxsan tahay, waa laga yaabaa inaan horay ugu dhaqaaqno oo aan wadaagno macluumaadkaaga haddii aan aaminsanahay inay dantaadu ku jirto. Waxaan sidoo kale la wadaagi karnaa macluumaadkaaga markii loo baahdo si loo yareeyo halista daran oo ku soo fool leh caafimaadka ama badbaadada.

**Xaaladahaas oo kale, marna macluumaadkaaga ma wadaagi doonno inaad na siiso ogolaansho qoraal ah mooyaane...**

- ✓ In aan bixino daryeelka caafimaadka dhimirka iyo wadaagista qoraallada cilminafsiga (psychotherapy notes)
- ✓ In aan suuqgeyno adeegyadeenna oo iibino macluumaadkaaga

**Xaalada lacag uruurinta,** waxaa laga yaabaa inaan kuula soo xiriirno dadaallada lacag uruurinta, laakiin waxaad noo sheegi kartaa in aanaan mar dambe kula soo xiriirinin.

**<u>Adeegsigeena iyo Shaacinteena</u>**

**Waxaan u isticmaali karnaa una wadaagi karnaa macluumaadkaaga si aanu:**

- ✓ **Kuu daaweyno**
  - Waanu isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka lana wadaagi karnaa xirfadleyda kale ee ku daaweynaysa.
  - Tusaale: Dhakhtar kaa dawaynaya dhaawac ayaa wuxuu waydiinayaa dhakhtar kale xaalada guud ee caafimaadkaaga.
- ✓ **In aanu u maamulo hay'addeena**
  - Waanu isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka lana wadaagi karnaa si aanu u maamulo howlaheena, si aanu u wanaajino daryeelkaaga, oo aan kula soo xiriirno markii loo baahdo.
  - Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan si aanu u maarayno daaweynta iyo adeegyadaada.
- ✓ **In aan dirno biilka adeegyadaada (Lacag bixinta)**
  - Waanu isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka lana wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aanu biilka ugu dirno iyo si aan uga helno lacag bixinta qorsheyaasha caafimaadka ama hay'adaha kale.
  - Tusaale: Waxaanu siinaynaa macluumaad adiga kugu saabsan caymiskaaaga caafimaadka si markaas ay u bixiso lacagta adeegyadaada.

**Waxaa naloo ogolyahay ama nalooga baahan yahay inaanu ula wadaagno macluumaadkaaga siyaabo kale — badanaa siyaabo waxtar u leh bulshada, sida caafimaadka bulshada iyo cilmi baarista.** Waa inaan buuxino shuruudo badan oo sharciga ka mid ah ka hor intaanan u adeegsan macluumaadkaaga ujeeddooyinkan. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html.**

- ✓ **Caawinta arrimaha caafimaadka bulshada iyo badbaadada,** waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan xaaladaha qaarkood sida…
  - Ka hortagga cudurka
  - Ka caawinta dib u celinta alaabta cilladaysan
  - Ka warbixinta falcelinta jirka ee xun ee daawooyinka
  - Ka warbixinta xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaadda, ama rabshada guriga
  - Ka hortagga ama yaraynta halista caafimaadka qof kasta ama badbaadadiisa
- ✓ **In la sameeyo cilmi baaris, CMMHC ma samayso tan.**
- ✓ **In loo hogaansamo sharciga**
  - Waxaanu wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada gobolka ama federaalku ay u baahan yihiin, oo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay doonayaan inay arkaan in aan u hoggaansamayno sharciga asturnaanta ee federaalka.
- ✓ **Kajawaabida codsiyada ku deeqida xubnaha iyo unugyada jirka, CMMHC ma samayso tan.**
- ✓ **In aan La Shaqayno Baaraha Caafimaadka ama Agaasimaha Aaska**
  - Waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka Sarkaalka baara maydka, Baaraha Caafimaadka, ama Agaasimaha Aaska marka uu qofku dhinto.

- ✓ **Si wax looga qabto Magdhawga Shaqaalaha, Sharci fulinta, iyo codsiyada kale ee Dowlada,** waan adeegsan karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka...
  - Sheegashooyinka Magdhawga Shaqaalaha
  - Ujeeddooyinka fulinta sharciga ama saraakiisha sharci fulinta
  - waxaan la waadi karnaa hay'adaha kormeerka caafimaadka ee howlaha uu sharcigu u ogolyahay

- Hawlaha gaarka ah ee dowladda sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha.

✓ **In laga jawaabo dacwadaha iyo talaabooyinka sharciga ah**
- Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan annaga oo ka jawaabeyna maxkamad ama amar maamul, ama ka jawaabidda yeerista maxkamada.

*Haddii sharciga gobolku u baahan yahay ogolaanshahaaga qoran si aan u siidayno macluumaadkaaga shakhsiyeed ee Daaweynta, waxaanu ku weydiin doonaa ogolaanshahaas. Si kastaba ha noqotee, ogolaanshahan guud ahaan looma baahna marka ay jiraan xaalad deg-deg ah oo caafimaad (haddii aadan awoodin inaad na siiso ogolaanshahaaga xaaladda aad ku sugan tahay darteed), ama annaga aan la-hawlgalayaasha isweydaarsano macluumaadka.*

**Waajibaadkayaga**

✓ Waxaa nalooga baahan yahay sharci ahaan inaan ilaalino asturnaanta iyo amniga macluumaadkaaga caafimaad ee dhawrsoon.

✓ Waxaan si dhakhso leh kuu soo ogaysiin doonaa haddii uu dalooshan dhaco oo laga yaabo in uu kashifay asturnaanta ama amniga macluumaadkaaga.

✓ Waa inaan raacno waajibaadka iyo habdhaqanka asturnaanta ee lagu sharraxay ogaysiiskan oo aan ku siino nuqul ka mid ah.

✓ Uma isticmaali doonno ama uma wadaagi doonno macluumaadkaaga aan ka ahayn sida halkan lagu sharaxay mooyee aan ka ahayn haddii aad qoraal noogu sheegto inaan saas yeeli karno. Haddii aad bedesho go'aankaaga wakhti kasta, noogu soo sheeg qoraal ahaan.

✓ Waxaanu raaci doonnaa Sharciga Ugu Yar ee HIPAA ee sheegaya marka uu adeeg bixiyuhu isticmaalo ama shaacin karo macluumaadka caafimaadka, bixiyeyaashu waa inay sameeyaan dadaal macquul ah oo lagu xaddidayo macluumaadka caafimaadka inta ugu yar ee lagama maarmaanka u ah fulinta ujeeddada laga leeyahay isticmaalka ama bixinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

**Isbedelada Shuruudaha Ogaysiiska**
Waan beddeli karnaa shuruudaha ogaysiiskan, isbeddelladana waxaa lagu dabakhi doonaa dhammaan macluumaadka aan adiga kaa hayno. Ogaysiiska cusub waxaa la heli karaa markii la codssado, waxaa laga heli karaa xafiiskeena, iyo websaydkeena.

**Taariikhda Dhaqan galka**: Maajo 1, 2016**. Taariikhda dib loo eegay:** 04/06/2021.

**Ogaysiiskan Dhaqanka Asturnaanta ayaa khuseeya:**
Xarunta Caafimaadka Dhimirka ee Bartamaha Minnesota iyo dhammaan barnaamijyadeeda

St Cloud, Waite Park, Buffalo, Elk River, & Monticello